


Caqabadaha Waxbarasho ee Soomaaliya kaddib Kumeelgaarkii

Eegid Muqdisho



Cabdullahi Sh. Aadam Xuseen, PhD

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2015, Muqdisho, Soomaaliya

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Ku saabsan qoraaga

Qoraagu waa xubin sare oo ka tirsan Sanduuqa Qaranka Qatar ee Cilmibaarista (QNRF), Hay'adda Qatar Foundation, fikrad kasta, talo kasta ama natiijo walba oo ku qoran warbixintaan ma ahan mid ka turjumaysa aragtida Sanduuqa Qaranka Qatar ee Cilmibaarista

Xuquuqda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Bogga hore: Sawir sii tirtirmaya ee curiyayaasha oo ku qoran derbi iskuul ku yaalla Muqdisho Xuquuqda: Xuquuqda daabacaadda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karow www.creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0.

Kala soo bax qoraalka bogga: www.heritageinstitute.org



Tusmo

Soo koobid	4
Is-dhex yaaca manhajka	4
Siyaasadda luuqadeed	4
Caqabadaha la xiriira macallimiinta	5
Raad-raac	5
Saamaynta dagaalku ku yeesho waxbarashada	6
Dib uqaabeynta manhajka iyo siyaasadda colaadda kadib	7-8
Hannaanka iyo baaxadda daraasadda	9
Natijjooyinka iyo falanqaynta	9
Su'aalaha manhajka	10
Nidaamyada Iskuullada	10
Hal waddan/Manhajyo kala duwan	11-12
Siyaasadda luqadda	13
Afka ardada wax lagu baro	13
Caalaminimada luqadda Ingiriiska	13
Rabitaanka diimeed	14
Xalka wakhtiga fog	14
Caqabadaha la xiriira macallinka	15
Macallimiinta oo aan tababarneyn	15
Mushaar yarida Macallimiinta	16
Macallimiin yaraan	17
Gunaanadka	17
Talooyin tixgelin mudan	17
Ku socota dawladda	17
Ku socota Dalladaha waxbarashada iyo maamulayaasha	18
Ku socota dadweynaha	18
Tixraaca	19-20

Soo koobid

Cilmibaaristan waxaa ay baartay caqabadaha waaweyn ee soo food saaray waxbarashada Soomaaliya kadib markii uu dalku ka gudbay marxaladii ku meel gaarka ahayd. Waxaana laga sameeyay cilmibaaristan gobolka Banaadir iyadoo gebi ahaanteedba diiradda lagu saaray waxbarashada aasaasiga ah ee ku salaysan nidaamka dugsiyada hoose, kuwa dhexe iyo kuwa sare (K-12). Waxaa la isticmaalay hab tayaysan oo cilmibaarista loo sameeyay, xogtana waxaa laga soo aruuriyay waraysiyo lala yeeshay 32 qof iyo waliba qiimayn dukumiintiyo la xariira mowduuca waxbarashada.

Daraasadda ayaa muujisay in Soomaaliya ay horyaallaan caqabado kala duwan marka la eego dhinacyada manhajka, tababarka macallimiinta, dhismaha iskuulaadka, jiritaan la'aanta waxbarasho dawladeed, waxbarashada gaarka ah oo aan lahayn shuruuc hagta, dhaqaale la'aan iskuuleed iyo dadka waxbarashada ka shaqeeya oo aan tababarnayn.

Si kasta oo ay ahaataba mowduucyada soo socda ayay ka qaybgalayaasha daraasaddu tilmaameen inay yihiin caqabadaha ugu muhiimsan ama ugu waawayn ee haatan hortaagan nidaamka waxbarashada ee dalka.

Isdhex-yaaca Manhajka

- Waxaan noo soo baxday kala duwanaa muuqata oo u dhexaysa nidaamka waxbarasho iyo maadooyinka laga dhigo iskuulada. Nidaamka afar-afar-afarta ah ee ay ardadu iskuulaad afar sano mid walba ku qaataan heerarka dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe iyo dugsiyada sare ayay iskuullada badankoodu isticmaalaan. Halka ay qaarkoodna isticmaalaan nidaamka lix-saddex-saddexda

oo ah lix sano oo dugsiyada hoose ah, saddex sano oo dugsiyada dhexe ah iyo saddex sano oo dugsiyada sare ah. Waxaana noo soo baxday inay kala duwanyihiin tirada maadooyinka lagu dhigo iskuullada.

- Daraasaddan waxay caddaysay inay dalka ka jiraan tiro manhajyo ah oo kala duwan oo dibadda laga soo dhoofiyay, inkastoo aysan caddayn inta ay yihiin tiradoodu maadaama ay ka qaybgalayaashu noo sheegeen tirooyin kala duwan. Qiyaastanaduse waxay tahay in waddankan lagu isticmaalo ilaa toban manhaj oo laga soo dhoofiyay toban waddan oo kale duwan. Manhajka Kenya iyo manhajkii hore ee waxbarasho ee Soomaaliya laga isticmaalayay ka hor dagaalkii sokeeye ayaa ah labada loogu isticmaal badan yahay.

- Ka qaybgalayaashu waxay sheegeen inaysan ku faraxsanayn xaaladda cakiran ee nidaamka waxbarashada Soomaaliya iyaga oo ku baaqay in la hagaajiyo. Waxayna si fiican ula socdaan dhibaatooyinka ka imaankara manhajyada waxbarashada ee dalalka kale laga keenay, taasoo qaar kamid ah ka qaybgalayaashu ay ku doodeen inay wakhtiga fog burburin-karto waxbarashada dalka. Dadkii daraasadda ka qaybgalay ma sheegin oo kaliya muhiimadda ay leedahay in la dhiso manhaj qaran oo dalku yeesho balse waxay ku dareen waliba si faahfaahsan qaabka loo baahanyahay inuu noqdo manhajkaasi.

Siyaasadda Luuqadeed

- Ma jiro hal iskuul oo ardada wax ku bara luqadda Soomaaliga iyada oo luuqadda la isticmaalo ay tahay Carabiga iyo Ingiriiska. Iskuul waxaa jira heerka dugsiyada hoose u isticmaalay luqadda Soomaaliga balse dib ugu wareegay Ingiriiska marka la gaaray heerka dugsiyada sare.

- Ka qaybgalayaasha ayaa ku kala qaybsamay luqadda la isticmaalayo midda ay noqonayso. Waxaa jiray dad ku dooday in laga dhigo luqadda Ingiriiska, kuwa doonaya in la isku daro Ingiriis iyo Carabi labadaba, iyadoo qaar kalana ay ku doodeen in luqadda Soomaaligu ay noqoto luqadda loo isticmaalayo waxbarashada dalka.

Caqabadaha la xiriira macallimiinta

- Inta badan macallimiintii daraasadda ka qaybgalay waxay ahaayeen dad waxbarashadoodu gaarsiisantahay heerka shahaadada jaamacadda ee bachelor-ka, hayeeshee inyar oo kamid ah ayaa baratay maaddooyinka la xariira waxbarashada iskuullada, intooda badanu malahayn khibradda iyo tababarka macallinnimo ee looga baahanyahay xirfadda. Taa macnaheeduna wuxuu noqonayaa in ay fasallada wax ka dhigayaan macallimiin aan lahayn xirfaddii iyo tababarkii loo baahnaa. Daraasadda ayaa sidoo kale muujisay inay jiraan in iskuullada qaarkood ay joogaan macallimiin qaatay tababar ay bixiyeen dallado la sameeyay dagaalladii sokeeye kadib balse uusan ahayn mid ku filan oo daboolaya arrimaha muhiimka ah sida aqoonta loo baahanyahay inay helaan macallimiinta dhiga iskuullada.

- Ma jiro hal hab oo loo isticmaalo bixinta mushaaraadka, macallimiintuna ma qaataan mushaar ku filan. Macallimiinta qaarkood waxayba qabtaan shaqooyin labaad si ay u kabaan dakhligooda. Waxaa laga dhadhansan karay in macallimiintu aysan ku qanacsanayn mushaarkooda, oo aysan u haynin niyad, islamarkaana ku jahwareersanyihiin xirfadda.

- Macallimiinta, waalidka iyo dadka waxbarashada ka shaqeeyaba waxa ay isku waafaqeen in bulshada Somaaliyeed aysan tixgalin iyo qadarin u haynin macallimiinta iyo waliba xirfadda macallinnimada. Wasaaradda waxbarashadu waxa ay muujisay walaac ku aaddan in dadka ugu fahmada iyo tayada badan bulshada dhexdeeda aysan ahayn kuwo usoo jeeda mihnadda macallinnimadda.

- Dalka waxa uu wajahayaa gabaabsi dhanka macallimiinta dhigta waxbarashada heerka aasaasiga ah. Tani waxay keentay in fasallada qaarkood ay fariistaan arday badan oo 50 gaaraya iyo jiritaan la'aan dad ku takhasusay maadooyinka ay dhigayaan (inta badan maadooyinka xisaabta iyo sayniska).

Raad-raac

Dagaalkii sokeeye markii uu qarxay bilowgii 1990-kii waxaa burburay nidaamka rasmiga ah ee waxbarashada. Dhismayaashii iskuullada waxaa loo badalay meel ay gabbaad ka dhigtaan dadka barakacaayasha ah (Abdi, 1998), dad badan ayaa iyaguna isaga qaxay waddanka (Lindley, 2008). Waxayna taasi keentay in Soomaali badan ay waayaan fursado ay wax ku bartaan iyadoo dib u dhac ku yimid sidii loo noolayn lahaa waxbarashada maadaama dalka ay isaga carareen dadkii aqoonta lahaa dagaalkii kadib.

Dib u dhiska nidaamka waxbarasho wuxuu soo bilowday bartamihii sagaashameeyadii. Iyadoo aysan jirin dawlad dhexe, dad is-xilqaamay iyo hay'adaha samafalka ayaa buuxiyey kaalintii bixinta adeegyada (Cassanelli & Abdikadir, 2008). Waxaa bilowday nidaam cusub oo waxbarasho kaasoo ay soo gudbinayeen hay'ado si gaar ah loo leeyahay, tusaale ahaan, aan ahayn wax dawladdu maamusho, iyo dad mutadawiciin

ah (Abdinoor, 2008). Nidaamkan cusub waxaa uu ardada siinayay fursado ay ku helaan waxbarashada aasaasiga ah, dadkii ka shaqaynayay waxay ku midoobeen oo ay samaysteen dallado waxbarasho. Nidaamkan waxbarasho ee noocan ah ayaa sii fidayay gaar ahaan xiligii danbe ee ay dalka ka jireen dawladihii kumeelgaarka ahaa.

Soomaaliya haatan waxay leedahay dawlad caalamku aqoonsanyahay, taasoo bilowday inay saamayn ku yeelato waxbarashada dalka. Iyadoo la tashanaysa kuwa bixiya adeegyada waxbarashada ayaa wasaaradda waxbarashadu bilowday diyaarinta manhaj qaran iyo sidoo kale siyaasado lagu maamulo nidaamka waxbarashada.

Ujeeddada cilmibaaristaan waa in si habaysan loo soo bandhigo caqabadaha waawayn ee dalka soo wajahaya xilligan oo laga gudbay marxaladii kumeelgaarka ahayd. Waxaan ku bilaabaynaa inaan dib u eegno tallaabooyinka ay waddamada qaarkood qaadeen markii ay soo noolaynayeen nidaamkooda waxbarashada xilliyadii ay dhammaadeen dagaallada hubaysan. Waxaan kaloo soo bandhigi doonnaa hab-raacii daraasadda iyo waliba natiijadii kasoo baxday. Warbixintan waxaa kaloo ku jira talo soo jeedin loogu talagalay dadka ay khasayso.

Saamaynta dagaalku ku yeesho waxbarashada

Waxaa soo badanayay weerarrada lagu qaadayo waxbarashada iyo nidaamyada iskuullada ee aduunka (O'Malley, 2010). Ururka Qaramada Midoobay u qaabilsan Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka ee magaciisa loo soo gaabsho (UNESCO) iyo ururrada kale ee caalamiga ah ayaa kaalin muhiim ah ka qaatay mawduucan iyagoo soo

bandhigay daraasado kala duwan oo daboolka looga qaadayo sida dagaallada hubaysani saamayn ba'an ugu gaystaan iskuullada iyo nidaamka waxbarashada guud ahaan (O'Malley, 2007; UNESCO, 2010). UNESCO waxaa ay sheegtay in goobo kamid ah caalamka ay "noqdeen kuwo aad khatar ugu leh qofka ah arday, macallin amaba saraakiisha waxbarashada" (O'Malley, p. 13). Hay'adaha caalamiga ah ayaa marar badan ka dhawaajiyay baahida loo qabo in la xoojiyo sharciyada caalamiga ah ee horay u jiray iyo masuuliyadda sharciga ah si loo ilaaliyo waxbarashada xilliyada ay jiraan colaadaha hubaysan iyo ammaan-darrada" (Al-Missned, 2010, p. 148).

Marka aan si guud u hadalno, cilmibaarisyo horey loo sameeyeyay ayaa lagu tilmaamay ugu yaraan sadex hab oo ay colaadaha hubaysani si toos ah ugu saameeyaan iskuullada iyo waxbarashada guud ahaan. Si isdaba-joog ah ayaa loo soo tabiyaa marar badan khasaaraha la gaarsiiyo goobaha waxbarashada oo ay ku jirto burbur loo gaysto ama in ay xarumo ka dhigtaan kooxaha hubaysani" (Al-Missned, 2010, p. 147). Waaxda Dawlada Britain u qaabilsan horumarinta caalamiga ah ee magaceeda loo soo gaabsho (DFID), ayaa soo tabisay in markii uu socday dagaalkii sokeeye ee waddanka Mozambique ee sannadihii 1970-yadiiyo 1980-yadii in ay korortay weerarada milatari ee lagu bartilmaameedsanayay iskuullada (DFID, 2001). Sidoo kalana xilligii dagaalkii sokeeye iyo xasuuqii Rwanda iskuullada ayaa loo gaystay "burburin, gubitaan iyadoo xataa gaadiidkoodii la bililiqaystay", 65boqolkiiba iskuullada oo gaarayay 1,836 khasaare ayaa soo gaaray" (Obura, 2003, p. 47). Bosnia iyo Herzegovina, inka badan kala bar iskuulladii khasaare ayaa soo gaaray amaba waaba la burburiyay.

Dib u qaabeynta Manhajka iyo siyaasadda colaadda kaddib

Burburka dhismayaasha iyo kaabayaasha waxbarasho waxaa ka daran, dhibaatada bini'aadamnimo ee si toos ah ugu dhacaysa ardada, barayaasha iyo maamulayaasha waxbarashada. Caruurta ayuu dagaalku saamayn lixaadleh ku yeeshaa iyagoo marwalba noqda kuwo qayb ka ah, ama qaxaya ama dhuumasho ka gala colaadaha.” (Sommers, 2002, p. 6). Markii ay dagaalladu dhammaadaan oo xabaddu ay joogsato, carruurta waxay la kulmeen dhibaato maskaxiyayn u gaarta oo kaga imaanaysa dagaalka ay goob joogga u noqdeen.

Ugu dambayn, dagaalku wuxuu sidoo kale saameeyaa barayaasha kuwaasoo laga yaabo inay dagaalka ka qaybqaataan amaba la dilo (Obura, 2003). Waxaa lasoo tabiyay in dalka Rwanda “75 boqolkiiba sannadkii 1994 macallimiintii la dilay ama ay xabsi u galeen ka qaybqaadasho ay gacan ka gaysteen xasuuqii” (Hodgkin, 2006, p. 200). Marka arrinkan la eego, Bangiga Aduunka ayaa u gartay in gabaabsiga macallimiintu ay ka mid tahay waxyaabaha laga dhaxlo dagaallada (World Bank, 2002).

Cilmibaarayaasha ayaa tilmaamay talaabooyin lagu ilaalin karo iskuullada, sida tallaaboyin la isticmaali karo wakhti kooban oo ay ku jirto ilaalo in la siiyo iskuullada iyo kuwa ku xiriira. Balse xalka waqtiga fog ee waxbarashada waxaa looga fadhiyaa waxbarashada lafteeda (O'Malley, 2010; Sinclair, 2010; UNICEF, 2011). Muhiimaddu waxay tahay in la ogaado in mararka qaar waxbarashada laftigeedu ay noqon karto isha amaba ay qayb ka qaadata colaadda (Bush & Salterelli, 2000; Sinclair, 2010; UNICEF, 2011). Sidaa darteed dib-u-qaabeyn lagu sameeyo waxbarashada waxay muhiim u tahay xaqiijinta in laga gaashaanto colaad dhacda mustaqbalka, waxbarashaduna nabadda ka qayb qaadata, taasoo shardi u ah horumarka dhaqaale iyo kan bulsho ee qaran kasta.

Khubarada iyo kuwa wax falanqeyya waxay tilmaamaan in waddamada colaaduhu ka dhaceen ay wadaagaan arrimo ay kamid yihiin “isticmaalka manhaj waxbarasho oo qadiimi ah iyo barayaasha oo isticmaala qaabab waxbaris oo ay sal tuhay kali-talishnimo” (Sinclair, 2010, p. 282). Sida dhabta ah nidaamka waxbarasho, gaar ahaanna manhajka ayaa laga yaabaa inay ahaayeen sababaha kicin kara colaadda marka hore. Paulson ayaa horay u tilmaamay in “dib u eegis, isbaddell lagu sameeyo manhajka iyo dib-u-habayntiisu” ay yihiin talaabooyinka waxbarashada la xiriira oo la adeegsado si colaadda looga kabto nabadana loo xoojiyo” (Paulson, 2011, p. 5). Isbadal lagu sameeyo manhaj horay u jiray oo ay kamid tahay in meesha laga saaro maadooyinka qaar, khaladaadkana la saxo laguna kordhiyo maadooyin cusub ayaa ka fudud in la sameeyo manhaj cusub. Samaynta manhaj cusub waa hadafka wakhtiga fog. Wuxuu qaadan karaa sanado inta laga soo saarayo mid cusub.

Taas ayaana keentay in xeel-dheerayaasha arrimaha manhajka iyo nabadda ay soo jeediyaan in manhajka si tartiib ah isbadal loogu sameeyo “si loo xaqiijiyo in aragti manhajeed-qaran la isula qaato” (Rose & Greeley, 2006, p. 9). Isbadalkan tartiibta loo samaynayo waxaa laga bilaabi karaa in meesha laga saaro dhigitaanka maadooyinka sida maaddada taariikhda iyo in sidoo kale meesha laga bixiyo buugaagta ay ku qorantahay waxyaabaha dadka xaasaasiyadda

u keenaya, luqad ahaan iyo sawirrada kicinaya dadka (Sinclair, 2002; Rose & Greeley, 2006; UNESCO, 1999). Su'aasha ku saabsan sidee maaddada taariikhda dadka u barnaa waa midda keenta caqabadda ugu wayn ee dagaalka kaddib soo food-saarta waddamada. Marka laga soo baxo dagaallada waxaa sida badan dhacda, in dadka ay ku kala aragti duwanaadaan sidii wax u dhaceen, sababta iyo cidda noqotay dhibbanayaasha.

Tallaabadii ugu adkayd taariikhda cusub ee isbaddel lagu sameeyay manhajka waddan ay colaadi ka dhacday waxaa qaaday Rwanda. Markii Jabhadda Wadaniyiinta Rwanda ay xukunka la wareegtay kaddib xasuuqii 1994, dawladdu waxay mamnuucday in caruurta loo dhigo taariikhda muddo toban sano ah (Freeman et al., 2008; Obura, 2003).

Isbadalka lagu sameeyo siyaasadaha waxbarashada waa arrin muhiim ah oo tixgalin gaar ah ay siiyaan waddamada colaadaha kasoo baxay sidii ay ugu soo dhisi lahaayeen waxbarashadooda. Afghanistan, tusaale ahaan, waxay soo saartay siyaasad cusub oo waxbarasho, taasoo ku salaysan Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Waxbarashada Qaranka (2007). Waxaa la caddeeyay arrimo ay kamid tahay in qof waliba uu helo waxbarasho tayo leh. In caruurta ay helaan waxbarasho ayaana ugu muhiimsan siyaasadahan. Waxaa la isla-qaatay Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Waxbarashada Qaranka. Arrinkan waa mid la iska fahmi karo waayo in gabdhuu ay iskuul aadaan ma ahayn mid suuragal ah markii Taalibaan ay haysteen waddanka. Siyaasadahan cusubna arrinkaas ayay jawaab u yihiin. Waxaana diiradda lagu saarayaa tayaynta waxbarashada “si loo gaarsiiyo heerka caalamiga ah”. Muhiimada ugu wayn waxay tahay in lagu xusay manhajka “mabaadii’da iyo qiyamka Islaamiga ah”, iyadoo labadan siyaasadoodba looga gol lahaa in lagu saxo nidaamkii waxbarashada ee xilligii Taalibaanku talinayeen.

Rwanda markii ay kasoo baxday colaadda, siyaasadda guud ee dawladdu ay ku adkaynaysay midnimada qaranka, dib u heshiisiinta iyo ka bogsashada colaadda waxay ahayd mid laga maamulayay gudaha nidaamka waxbarashada. Heerka qaran iyo midka deegaanba, ujeedooyinka waxbarashada, qorshaha waxbarashada iyo manhajka qarsoonba dib u qeexid ayaa lagu sameeyay (Hodgkin, 2006). Siyaasadahan cusub waa kuwo diiradda lagu saarayo waxyaabaha ay wadaagaan dadka reer Rwanda oo aan lagu sheegayn waxyaabaha la isku khilaafsanyahay oo ujeedkuna yahay mustaqbal wanaagsan oo uu hogaaminayo dhaqanka iyo qiyamka ubumwe (midnimo, isku-tiirsanaan) iyo ubupfura (sharaf, wanaag, iyo xurmo loo hayo awoowayaasha) (Obura, 2003). Hal ku dhigga ah “kulligeen waxaa nahay dad Rwandan ah” ayaa la faafiyey iyada oo faafintana loo isticmaalay waddooyin kala duwan oo warbaahintu ku jirto (Freeman et al., 2008).

Bosnia iyo Herzegovina waxaa la bilaabay isbadal dhanka waxbarashada ah markii la gaaray heshiiskii nabadeed ee Dayton (Dayton Peace Agreement). Qorshaha isbadalku wuxuu ahaa mid looga hortagayo xiisadaha issirka ku salaysan iyo sidii looga gaashaaman lahaa in mustaqbalka uu dhaco dagaal issir ku saleysan. Waxyaabaha kale ee la qiray waxaa kamid ahaa in dadka la siiyo waxbarasho tayadeedu sarrayso ee iskuullada isku dhafka ah ee dadyowga dhaqamada kala duwan, taasoo xor ka ah siyaasad, diin, dhaqan iyo waxyaabaha kale ee keeni kara yasmo ama takoor (Wasaarada arrimaha Bulshada ee Bosnia & Herzegovina, 2004).

Hannaanka iyo baaxadda daraasadda

Qaabka cilmibaaris ee tayada (Qualitative Research) ayaan u isticmaalnay markii aan daraasaddaan samaynaynay, sababtoo ah cilmibaaruhu muusan rabin inuu sii saadaaliyo jawaabaha ay bixinayaan ka qaybgalayaashu, balse wuxuu rabay inuu sahmiyo sida ay ka qaybgalayaashu fikrad ahaan u arkaan arrimaha baaritaanka lagu waday.

Guud ahaan, 32 qof ayaa ka qaybgashay daraasadda, waraysiyadana waxaa la qaaday intii u dhexaysay bishii March 2013 iyo bishii November 2014. Waraysiyada waxaa lala yeeshay 7 macallin, 10 maamule Iskuul, 4 gudoomiye dalladeed, 7 waalid, labo shaqaale sare oo ka mid ah wasaaradda waxbarashada iyo 2 kamid ah wakiillo ururrada caalamiga ah. Sharciga waxbarashada ee golaha wasiiradu meel-mariyeen xagaagii sannadkii 2014, iyo qabyo qoraalka siyaasadda waxbarashada ee ay dajisay wasaaradda waxbarashadu (MoE), ayaa iyagana dersid iyo falanqaynba aan ku samaynay. Daraasadda waxaa ay si buuxda u waafaqsantahay tilmaamayaasha hufnaanta uu soo saaray Ururka Waxbarashada Cilmibaariseed ee Britain (BERA, 2004) qaabka ay u sameeyaan cilmibaarisaha arrimaha bulshada. Waxaan isticmaalnay tallaabooyinka dhanka hufnaanta ah sida: in qofka warbixin laga siiyo daraasadda, xuquuqda uu qofku u leeyahay inuu ka bixi karo ka qaybqaadashada daraasadda iyo in qofka loo xaqiijiyo in aan magaciisa lagu xusayn diraaasadda.

Daraasaddan waxaa laga qaaday gobolka Banaadir oo inta badan ka qaybgalayaashu ay ka shaqeeyaan, natiijada kasoo baxdayna waxay noqonaysaa mid ka turjumaysa

aragtida dadka ka qaybgalay. Marka la akhrinayo natiijada daraasadda waxaa iyaduna mudan in maskaxda lagu hayo, in daraasaddu ay yool leedahay, taas oo muujinaysa koobnaanta daraasadda. Gabi ahaanteedba waxaan diiradda ku saarnay waxbarashada aasaasiga ah ee hoose, dhexe iyo sare (K-12), ee aannaan baarin heerarka kale ee waxbarashada dalka ka jirta.

Natiijada iyo falanqaynta

Daraasadan waxaan ku ogaannay in nidaamka waxbarashada Soomaaliya ay haystaan caqabado adag oo dhinacyo kala duwan leh kuwaasoo ay kamid yihiin:

- Nabadgalyada iyo amniga macallimiinta, ardayda iyo waalidiinta
- Dhismayaasha iyo xarumaha iskuullada oo liita
- La'aanta waxbarashada dowladda
- Waxbarashada gaarka loo leeyahay oo aan lahayn shuruuc hagta.
- Culays xagga dhaqaalaha ah
- Macallimiin aan tababarnayn iyo jiritaan la'aan fursado tababar oo kor loogu qaadayo xirfada macallimiinta
- Siyaasadda luuqadeed oo liidata
- Caqabado la xiriira manhajka.

Mid kamid ah hoggaamiyayaasha dalladaha waxbarasho ayaa sheegay in caqabadaha waxbarashada ay yihiin kuwo tirada ka batay oo aan la tirin karin. Daraasaddaanna kuma awoodno in aan wada falanqaynno dhammaantood. Waxaanna daraasaddaan ku soo qaadanaayna saddex caqabadood oo si taxane ah ka qaybgalayaashu ku soo celceliyeen, kuwaas oo kala ah: manhajka, siyaasadda luuqadda iyo caqabado la xiriira macallimiinta.

Su'aalaha Manhajka

Nidaamyada Iskuullada

Daraasadda ayaa lagu ogaaday kala duwanaanshaha u dhexeeya nidaamyada waxbarashada ee iskuullada dalka. Waxaa kaloo noo soo baxday farqiga u dhexeeya maaddooyinka lagu dhigo iskuullada. Nidaamka sida aadka ah looga isticmaalo dalka ayaa ah mid ay caruurta ay afar afar sano ku dhigtaan iskuullada hoose, dhexe iyo sare midkiiba (nidaamkaafar-afar-afar). Waxay u badantahay in dadka haatan ka shaqeeya nidaamka waxbarashada Soomaaliya ay wax ku soo bardeen habkaas ama ay ku soo shaqeeyeen, taasoo sharraxaysa sida uu habkaasi u noqday mid ku baahay dalka. Waxaa kaloo noo soo baxday in habka lix-sadex-sadex, lix sano dugsiga hoose, hadana sadex sano dugsiga dhexe iyo sadex sano dugsiga sare, uu yahay mid isna dalka ka jira.

Waxaa jira farqi u dhexeeya maaddooyinka lagu dhigo iskuullada. Badankoodu waxay ku dhigaan 7 maaddo heerarka dugsiyada hoose iyo dhexe, halka 11 maaddo ay qaataan ardada dhigata dugsiyada sare. Iskuullo kale ayaa iyaguna dhiga koorsooyin waxbarasho oo kala duwan oo marka la isku daro ah toddobo dugsiga hoose, 9 dugsiga dhexe iyo 12 maaddo oo lagu qaato dugsiga sare. Waxaan kaloo ogaanay inay jiraan iskuullo dhiga siddeed maaddo dugsiga hoose, 10 maaddo dugsiga dhexe iyo 12 maaddo ardada dhigata dugsiga sare.

Kala duwanaanshaha u dhexeeya nidaamyada waxbarashada iyo maaddooyinka iskuullada lagu dhigo ayaa ahayd mid jaahwareerisay dadka qaarkood. Hal maamule iskuul ayaa

sheegay inaysan jirin 'siyaasad guud oo waxbarashada dalku leedahay. Qof walba wuxuu dhigaa wixii uu jecelyahay'. Ka qaybgalahaas daraasadda waxa uu hadalkiisa ku daray, 'Imtixaanaadka dalku maahan kuwo midaysan. Xilliyada la qaato maaddooyinka iyo jadwalka iskuulladu ma ahan kuwo midaysan iyaguna', isagoo sheegay in kala duwanaanshaha iyo farqiga u dhexeeya iskuulladu ay tahay mid ka baaxad wayn farqiga ku jira nidaamka waxbarasho iyo maaddooyinka la dhigo intaba.

Kala duwanaanshahaasi wuxuu ku keenay dhibaato ardada doonaysa inay ku biiraan iskuul ay dallad kale maamusho. Maamule ayaa sheegay in "arday doonaysey in loo wareejiyo iskuul ka tirsan dallad (uu magacaabay) aan la aqbalin sababtuna ay tahay in aan loo aqoosanayn in ay dugsi hoose dhammeeyeen ilaa ay sagaal sano soo dhigtaan dugsiga hoose." Ka qaybgalayaasha ayaa dareensan in kala duwanaanshaha u dhexeeya hababka waxbarasho uu saamayn aan haboonayn ku yeeshay waxbarashada loona baahanyahay in arrinkaas ay maanka ku hayaan masuuliyiinta maamula siyaasadaha waxbarashada.

Kala duwanaanshaha waxaa xataa kamid ah in iskuullada xillayada la furo ay kala duwanyihiin, dharka ardadu xirtaan uu kala duwanyahay iyo sidoo kale maalmaha fasaxa, iyadoo iskuullada qaarkood ay furanyihiin maalinta xorriyada ee 1da Luuliyo. Habka imtixaanaadka xataa ma ahan mid ay ku midaysan yihiin iskuulladu, inkastoo wasaaradda waxbarashada ay noo sheegtay in arrinkaas la diyaariyay, iyadoo lala kaashanayo dalladaha waxbarashada, si imtixaanaadka qaran loo dejiyo sannadka 2014. Si kastoo ay ahaatoba, sida aan ku arki doono qaybta soo socota iskuulladu waxay isticmaalaan manjahyo iyo hannaan waxbarid oo kala duwan. Mana cadda sida loo midayn

karo manhajyada iyo qaabka ardayda wax loo baro maadaama ay kooxaha dalladaha kala duwan uu mid waliba ardadiisa baro maadooyin ka duwan kan kale.

Hal waddan/Manhajyo kala duwan

Daraasaddan waxay cadaysay in ay dalka ka jiraan manhajyo kala duwan oo laga soo qaatay dibadda, inkastoo aan la ogayn tirada dhabta ah ee manhajyada dalka ka jira, ka qaybgalayaashu waxay noo sheegeen tirooyin kala duwan. Tusaale ahaan, mid kamid maamulayaasha aan waraysannay ayaa noo sheegay in dalka ay ka jiraan 24 manhajyo waxbarasho. Maamule kale ayaa isna tirada ku sheegay in ka badan 10 manhaj, isagoo aan na siinin tiro go'an. Qiyaasteennu waxaa weeye inay jiraan ilaa 10 manhaj waxbarasho oo laga soo minguuriyay wadamada Kenya, India, Pakistan, Dalka Isu tagga Imaaraadka Carabta, Sacuudiga iyo Yemen. Mid kamid ah madaxda dalladaha waxbarashada ayaa noo sheegay in iskuulladu ay cutubyo kasoo qaataan manhajyo kala duwan ayna sidaa ku soo saaraan buugaagta ay wax ka dhigaan iyagoo isku qasaya manhajyo ay wadammo kala duwan leeyihiin. Iskuulladada qaarna waxayba beddelaan manhajka oo fasal wax ay sanad u dhigaan ayaysan sanadka kale soo celin (Some schools even change curricula from one grade to another.)

Labo manhaj ayaa noqday kuwo si baahsan waddanka looga isticmaalo: Manhajkii hore ee dalka laga isticmaali jiray xilligii ay jirtay dawladii dhexe ee Soomaaliya iyo manhaj kale oo laga keenay Kenya. Labadan marka la is barbar-dhigana manhajkii hore ee Soomaaliya ayaa ah mid wali si baahsan loo isticmaalo.

Ku baahsanaanta manhajka Kenya ee dalka waxaa lagu sababeyn karaa isu dhawaanshaha

dhul ahaaneed, taasoo sahlaya in dadka waxbarashada ka shaqeeya ay si fudud ku heli karaan buugaagta. Qof madax ka ah dallad waxbarasho ayaa sheegay in “Kenya ay tahay waddanka noogu dhow”. Sababta kalana waxay tahay qaxooti badan oo Soomaaliyeed oo u qaxay dalka Kenya markii uu dhacay dagaalka sokeeye kuwaasoo khibrad u yeeshay nidaamka waxbarashada dalka Kenya. Sababta sadexaad ee muhiimka ah ayaa ah inuu ku qoranyahay luqadda Ingiriiska. Inta badan iskuulladii ka qaybqaatay daraasadan waxay isticmaalaan luqadda Ingiriiska, go'aan dhib lehna ma ahan inay qaataan markaas manhajka Kenya maadaama uu ku qoranyahay luqadda Ingiriiska.

Ka qaybgalayaasha ayaa ogsoon dhibaatooyinka laga dhaxlo manhaj dal kale laga soo qaatay. Mid kamid ah dadkii ka qaybqaatay daraasadda oo ka shaqeynayay iskuul isticmaala manhajka Kenya ayaa ku doodday in manhajka Kenya uu yahay mid “diiradda lagu saaray dhaqanka, dabeecadaha iyo juqraafiga dalkaas,” isaga oo muujinaya in ay tacliintu tahay mid ka soo dhex-dhambalmaysa waxa bulshadu aaminsan tahay aysanna ahayn arrin aan mabaa'dii xambaarsanayn. Mid kamid ah madaxda dalladaha ayaa si toos u abbaaray dhibaatooyinka dhaqan ee laga dhaxlo manhaj uu dal kale leeyahay, isagoo sheegay in tusaale ahaan uu buug Kenya leedahay uu isticmaalayo magacyada sida: ‘Kdoga’ iyo ‘Umbyia’ balse uusan isticmaalayn magacyo Soomaali ah sida ‘Sahro’ iyo ‘Maxamed’.” Ka qaybgale kale oo ah gudoomiye ku xigeen dallad waxbarasho ayaa sheegay in manhaj dal kale laga soo minguuriyay uu yeelan karo dhibaato timaada wakhtiga fog oo ‘burburin karta’ Soomaaliya. “Waxaa jira siyaabo kala duwan oo bulshooyinka loo burburiyo. Mar walba ma ahan mid qori kali ah loo isticmaalo. Hadii aad rabtid inaad bulsho burburiso waxaad u

isticmaali kartaa manhajkooda”. Waxaa laga yaabaa inay buunbuunin tahay, balse waxaa caddaan ah inay jiraan labo hab oo waxbarasho – mid loogu talo galo in ardada lagu hormariyo iyo mid kale oo jug-jug meeshaada jog ah. Freire (1970) ayaa ku kala macneeyay labadan hab ee ardayda wax loo baro in midi uu macalinku hawsha badankeeda wado ay ardaydu la mid yihiin sidii weel maran ama bangi wax lagu shubayo kan kalana ay macallinka iyo ardayguba aqoon-wadaagga isla wadaan, mid walibana kaalin leeyahay. Sida laga soo xigtay Freire, habka koowaad waxaa isticmaala kuwa dadka cadaadiya si ay u sii wadaan haysashadooda bulshada, halka kan labaadna loogu talagalay in lagu xoreeyo, laguna hormariyo dadka. Sida aan ku muujinnay dulmarka cilmibaarista mawduuca waxbarashada laga sameeyey, waxbarashadu waa seef labo af leh, qorshaynteeduna waxay u baahantahay taxaddar ku salaysan xog.

Ka qaybgalayaashu kuma doodin oo kali ah muhiimadda ay leedahay in la hormariyo in la sameeyo manhaj qaran, balse waxay sidoo kale na siiyeen muuqaal faahfaahsan oo ku aaddan qaabka uu u ekaanayo manhajka waxbarashada Soomaaliya. Waa inuu noqdaa mid uu aasaas u yahay dalka “dhaqankiisa iyo diintiisa” sida uu noo sheegay maamule iskuul, laguna daro maadooyin ka hadlaya waxbarashada ku saabsan nabadda. “Soomaalidu waxay waligood ku soo jireen colaad, iyagoo isku dagaali jiray biyaha, dhulka ama haweenka. Taariikhda Soomaalida waxay ahayd mid mar waliba uu qalalaaso hareeyay” sidaas waxaa sheegay mid kamid ah madaxda dalladaha waxbarashada. In manhajka waxbarashada Soomaaliya lagu daro waxbarashada ku saabsan nabadda ayaa si isdaba-joog ah ka qaybgalayaashu u xuseen, taasoo muujinaysa kalsoonida ay ku qabaan doorka wanaagsan ee waxbarashadu ka

geysan karto horumarinta iyo adkaynta nabadda, taasoo ayidaysa xogta laga helay cilmibaaristii horay looga sameeyey mowduucan (Bush & Saltarelli, 2000; Elmi, 2010; UNICEF, 2011).

Shaqaalaha waxbarashada sida kooxaha dalladaha waxbarashada ayaa ka qaybgalayaashu u arkaan inay yihiin haatan kuwo buuxiyay meeshii ay bannaysay dawladdadhexe. “Waad qiyaasi kartaa waxa ku dhici lahaa waxbarashada dalka haddii qof walba uu sugi lahaa inta dawlad laga helayo,” sidaas waxaa yiri mid kamid ah dadka noo soo jawaabay.

Dhammaan ka qaybgalayaasheennu, iyagoon kala harin, waxay muujiyeen si qotodheer inay uga xunyihiin burburka nidaamka waxbarashada Soomaaliya soo gaaray, iyagoo ugu baaqay dawladda inay qaaddo tallaabo ay dalka ugu samaynayso manhaj qaran. Gudoomiyaha mid kamid ah dalladaha waxbarashada ayaa noo sheegay in haatan manhajka jira “uusan ahayn mid ay ku qanacsan yihiin isla markaana uusan ahayn mid daboolaya baahida waxbarashada ee ardada Soomaaliyeed.”

“Dawlada ayaa looga fadhiiyaa inay dadka waxbarasho siiso. Mana ahan ganacsi gaar loo leeyahay ama ay bixin karaan shakhsiyaad,” ayuu yiri hal maamule.

Balse horumarka ayaa ahaa mid gaabis ah. Wasaaradda Waxbarashada oo la tashanaysa dadka ay khusayso, ayaa qaadday tallaabooyin ay ku soo saarayso siyaasad waxbarasho iyo manhaj waxbarasho oo midaysan. Inkastoo hawshaani ay tahay mid soo bilaabatay sannado ka hor, haddana baarlamaanka Soomaaliya wali ma ansixin sharciga qabyada ah ee ay ku qorantahay siyaasadda waxbarashada uu dalku yeelanayo.

Siyaasadda Luuqadeed

Afka Ardayda wax lagu baro

Daraasadan ayaa noo soo saartay in iskuulladu ay isticmaalaan luqado kala duwan oo isku qasan oo Ingiriiska iyo Carabigu ay yihiin labada loo badanyahay. Iskuullada ka qaybqaatay daraasadan, Ingiriiska ayaa noqotay luqadda sida baahsan loo isticmaalo iyadoo luqadda Carabigu soo raacdo. Iskuullo aan badnayn oo ay dawladdu maamusho ayaa isticmaala luqadda Soomaaliga, balse tiradoodu aad bay u yartahay marka la barbardhigo tirada sii kordhaysa ee iskuullada gaarka loo leeyahay oo sannad walba sii siyaadaya. Xataa iskuullada dawladda, Af-Soomaaligu waxaa loo isticmaalayaa heerka dugsiga hoose oo kaliya. Sida ku qoran qabyo qoraalka siyaasada waxbarashada luuqadaha Ingiriiska iyo Carabiga waxaa loo isticmaali karaa kaliya waxbarashada heerka dugsiga sare.

Daraasadan kuma aanan helin hal iskuul oo luqadda Soomaaliga ah ay tahay luqadda uu ardada wax ku baro. Hal iskuul ayaa isticmaala luqadda Soomaaliga heerka dugsiga hoose, balse marka lasoo gaaro heerka dugsiga sare Ingiriis ayuu isticmaalaa. Baaritaan la sameeyay ayaa muujiya in iskuulkaasi uu taageero dhaqaale ka helayay hay'ad caalami ah, taasoo tilmaamaysa inuu dhaqaale ahaan yahay mid isku filan marka la barbar dhigo iskuullada kale ee daraasadda ka qaybqaatay. Waxaa mudan inaan xusno iskuullada kale ee luqadaha qalaad dadka wax ku bara waxay suugaanta Soomaaliga ardada ugu dhigaan luqadda Soomaaliga ah.

Markii la waydiiyay sababta ay u isticmaalaan luqadaha qalaad inay ardada wax ugu dhigaan ayay ku tilmaameen in Ingiriiska uu yahay luqad caalami ah, halka Carabiga sababta ka dambaysa isticmaalkiisa ay tahay mid diimeed.

Caalami ahaanta Ingiriiska

Ka qaybgalayaasha ayaa sheegay in Ingiriisku yahay luqad caalami ah, in wax lagu barto Ingiriiskana ardada waxay siinaysaa fursado ay kula tartamaan ardada caalamka. Hal maamule ayaa yiri, "Waxaa u sahlanaanaysa ardada waxbarashada jaamacadaha, maadaama jaamacaduhu wax ku dhigaan Ingiriis." Maamule kale ayaa yiri, "Ingiriiska waxaa u dooranay si ardadeennu ula tartamaan ardayda kale ee caalamka."

In ardadu ay wax ku bartaan luqadda Ingiriiska waxay ka caawinaysaa inay shaqo helaan mustaqbalka, sida aan kasoo xigannay qaar kamid ah ka qayb-galayaasha cilmibarista. "Waxay u badantahay inaad shaqo hesho hadii aad ku hadli karto Ingiriis" ayuu yiri maamule iskuul, oo kusii daray in luqadda Soomaaligu ay ku egtahay dalka oo kaliya dadka ku hadla. Sababta kale ee loo doortay ayaa ah marka qofka uu aadayo safar dibadda ah inay tahay luqadda Ingiriiska mid aduunka looga hadlo. "Luqadda Soomaaligu waxay noqotay mid laga tagay, carabigana waxaa looga hadlaa wadammo dhowr ah, laakiin Ingiriisku waa luqad caalami ah," waxa yiri maamule iskuul.

Isticmaalka luqadda Ingiriisku waxay leedahay faa'iidooyin la taabankaro. Inta badan iskuullada waa kuwo gaar loo leeyahay oo loogu talo galay in faa'iido dhaqaale laga helo, taasoo macnaheedu yahay in maamulayaasha iskuullada luqadda Ingiriiska ku baxa uu u dhexeeye tartan ay ugu jiraan ardada, iyadoo ay muuqato in ay ganacsi ahaan ay noqotay mid gadmaysa.

Rabitaanka diimeed

Iskuullada wax ku dhiga luqadda Carabiga ayaa sheegay in ay u isticmaalaan si ardada ay u baraan Quraanka iyo Xadiiska iyagoo adeegsanaya luqadda asalka ah. “Waxaan dooranay luuqadda Carabiga, sababta oo ah ardadeennu waa Soomaali waana Muslimiin,” ayuu yiri maamule “sidaa darteedna waxaan rabnaa inay ku bartaan Carabiga.” Cilmibaarayaashii hore ayaa iyaguna sheegay sababo kuwan lamid ah marka ay tageen iskuullada wax ku dhiga Carabiga iyo manhajyada laga soo qaatay wadamada Carabta ah (Elmi, 2010).

Xalka wakhtiga fog

Inta badan dadkii ka qayb-qaatay daraasadda ayaa sheegay habka waxbarasho ee haatan jira inuu yahay mid ka dhashay duruufta, islamarkaana uu yahay mid aan si wanaagsan loo qorsheynin. Waxaana laga maarmaan noqotay inaan ogaanno fikirka ay ka qabaan ka qayb-galayaashu xalka loo baahan yahay wakhtiga fog ee ku saabsan arrinka luqadda loo isticmaalayo waxbarashada dalka maadaama uu sharciga qabyada ah ee siyaasadda waxbarashada ee ay soo saartay wasaaradda waxbarashadu uu yahay mid tilmaamaya in lasii wado wax ku barashada luqadaha qalaad.

Dadkii nagala qayb-galay daraasaddan arrinka waxay ka bixiyeen aragtiyo kala duwan iyagoo u kala jabay sadex qaybood oo kala sheegay in ardayda wax lagu baro: Ingiriis, in la isugu daro Carabi iyo Ingiriis iyo qaar soo jeediyay in luqadda Soomaaliga ah wax lagu baro ardayda.

Midka mid ah dadkii u ola-olaynayay in la qaato Ingiriiska ayaa sheegay “dhammaan jaamacadaha aduunka waxa lagu qaato

waxbarashada Ingiriis, ardadeennu markay qalin jabiyaan xagee aadayaan? Dibadda ayeey aadi doonaan. Marka ay dibadda tagaan waxaa ku adkaanaysa in ay Ingiriis wax ku bartaan. Waana sababta aan ugu malaynayo in luqadda Ingiriiska laga dhigo luqad lagu qaato waxbarashada dalka.”

Qaar kale ayaa ku dooday in la isku daro seddexda luuqadoodba. Mid kamid ah gudoomiyayaasha dalladaha waxbarashada ayaa aaminsan “in dugsiga hoose Af-Soomaali lagu qaato, dugsiga dhexana Carabi, dugsiga sare isna Ingiriis lagu qaato.”

Kuwo kale ayaa soo jeediyay in luqadda Soomaaligu ay noqoto midda kaliya ee wax looga barto dalka. “Marka koowaad waxaa nahay Soomaali, luqadda Soomaaligu waxay qayb ka tahay haybteenna, in dadka Af-soomaali wax lagu baro ayaa loo baahanyahay,” ayuu yiri gudoomiyahaasi. Hoogamiye dalladeed kale ayaa isna ku raacay, “Ma wanaagsana in ardadeenna wax lagu baro luqado qalaad. Waxaan u baahannahay in luqadda Soomaaliga lasoo nooleeyo. Waxaan raacsanahay dadka aaminsan in Soomaaliga wax lagu barto, markaas kadib ayaa Ingiriis iyo Carabi la baran karaa. Waxaan rabnaa in la sameeyo xarun lagu baro luqadda Soomaaliga, iyo waliba aqoonyahanno horumarin kara luqadda Soomaaliga si ay u noqoto mid wax lagu barikaro ardada.”

Siyaasadda qabyo qoraalka ah ee waxbarashada taasoo ay golaha wasiirradu meel-mariyeen sannadkii 2014 ayaa soo jeedisay in luqadda Soomaaliga ah lagu qaato ilaa dugsiga hoose, luqadaha Carabiga iyo Ingiriiskana lagu qaato waxbarashada heerka dugsiga sare. Tallaabadaas ayaa u muuqata inay tahay mid ayidaysa sida hadda wax u socdaan, isla markaana iska indhohirtiraysa natiijada kasoo baxday daraasadaha la sameeyay oo si aqlabiyad ah u taageeray in luqadda

hooyo arday wax lagu bari karo maaddaama ay taasi kobciso kororka aqoonta ee ardaya (Benson, 2004; Gacheche, 2010; UNESCO 2006; Kosonen & Young, 2009). Cilmibaaris ayaa muujisay in hadii ardada ay waxbarashada ku qaataan luqaddooda hooyo ay u badantahay inay la socdaan casharrada ayna u fududaato in macallimiintooda ay la hadlaan, taasoo muhiim u ah waxbarashada (Trudell, 2008). Aragtida ay qabaan qaar kamid ah ka qayb-galayaashii soo jeediyay isticmaalka luqadaha qalaad ma ahan mid ka turjumaysa xogta laga helayo daraasaadka laga sameeyey mowduuca. Doodda ku saabsan luqadda rasmiga ah ee loo isticmaalayo waxbarashada dalka waa mid horay uga dhex socotay dadka ka shaqeeya waxbarashada balse waxay ahayd mid aysan ku jirin dadweynaha iyo dawladda labadaba. Meel-marinta luqadda wax lagu baranayo tan ay noqonayso waa go'aan looga fadhiyo dawladda. Balse go'aankaasi waa inuu noqdaa mid lagu jaangooyo caddayn, xog iyo cilmibaaris la sameeyay iyo in isha lagu hayo mustaqbalka iyadoo la eegayo doorashadaasi saamaynta uu ku yeelan karo luqadda, haybta iyo dhaqanka.

Caqabadaha la xiriira Macallinka

Waxaa noo soo baxday sadex caqabadoo oo la xiriirta macallimiinta, kuwaas oo kala ah: la'aanta aqoon bare-annimo, mushaarkooda oo yar iyo macallimiintii oo yaraaday.

Macallimiinta aan tababarnayn

Inkastoo inta badan macallimiintii nagala qayb-gashay cilmibaarista ay ahaayeen kuwo haysta shahaado jaamacadeed, kuwo yar ayaa soo bartay maadooyinka la xiriira waxbarashada amaba soo maray tababar macallinnimo. Maamule ayaa sheegay in xirfad la'aanta

macallimiinta ay tahay arrinta ugu daran ee waxbarasho ee qaranka soo food-saartay. "Waxaa lagu shaqaaleeyaa iyadoo loo eegayo, 'Macallin ma noqonkartaa?' 'Dadka wax ma bari kartaa?' Waxaa jira Macallimiin tiro yar oo haysta takhasus maado." hogaamiye dalladeed ayaa ku dooday, "waxaan u baahannahay macallimiin haysta takhasus macallinnimo."

Macallimiinta ka qalinjabiyay culuumta ganacsiga iyo tiknoolojiyadda ayaa ka badnaa kuwa ka qalinjiiyay kuliyadda macallinimada. Dad badan oo macallimiin noqday ayaa markii hore bartay takhasyo kale. "Waxaan bilaabay inaan ka shaqeeyo iskuulkaan qeybta maaliyadda. Waxaana ahaa xisaabiyaha iyo qasnajiga, markii dambana waxaan noqday macallinka fasalka koowaad," ayuu yiri mid kamid ah dadkii daraasadda nagala qaybgalay. Waxaan kaloo ku ogaannay daraasadda in iskuullada qaarkood ay ka bilaabatay tababar la siinayo macallimiinta, oo ah mid soconaya 3 ilaa 10 maalmood kaasoo la doonayo in lagu soo saaro macallimiin leh xirfaddii loo baahnaa. Qaarkood waxayba u ahayd tababarkii ugu horreeyay ee macallinnimo. Mawduucyada ay qaateen waxaa kamid ahaa hababka wax loo baro ardada, sida fasalka loo maamulo iyo sida loo qorshaysto casharrada. Waxaana tababarradaan isku soo dubbarida dalladaha waxbarashada oo mararka qaar gacan ka helaya hay'ado caalami ah, balse waa kuwo aan joogto ahayn oo xaddidan. Sarkaal sare oo ka tirsan wasaaradda waxbarashada ayaa xaqiijiyay in "macallimiinta la siiyo tababarro, balse aysan ahayn kuwo si joogto ah u dhaca."

Arrinka walaaca keenaya ayaa ah in aysan jirin tababar laga siiyo macallimiinta sida ay wax u bari lahaayeen ardada naafada ah, gaar ahaanna kuwo maskax ahaan iyo muuqaal ahaanba ay dagaaladu u waxyeelleeyeen. Macallimiin badan ayaa sheegay in fasalka ay dhigtaan arday naafo ah balse ay dadaal badan

u galeen inay u adeegaan iyagoo u ogolaada in fasalka ay xilli dambe soo gali karaan iyo inay wakhti badan ugu daraan si ay u dhammaystaan imtixaanka. “Waxaa iskuulka dhigta labo arday oo dhagoolayaal ah, iyo sadex arday oo indhaha aan si fiican wax uga arag iyo hal gabar ah iyo labo wiil oo laan-garre/jiis ah,” ayuu yiri maamule, isagoo ku sii daray in aysan ardadaasi helin daryeel wanaagsan. Maamule kale ayaa tilmaamay, “Waxaan u baahannahay waxyaabo aan ku taageerno ardadaas sida farta indhoolayaasha.”

Mushaar-yarida macallimiinta

Mushaar yarida macallimiinta ayaa kamid ah caqabadaha ugu ballaaran ee Soomaaliya waxbarashadeeda soo food-saaray. Macallimiinta oo markii horaba yaraa ayaa isaga tagaya ama horayba uga tegay barranimada sababo la xiriira mushaar yarida iyo bulshada oo aan wax xushmad ah u haynin darteed. Kuwooda xataa doonaya inay kasii shaqeeyaan ayaa raba in kaalintoodu ku ekaato mid maamul kali ah.

Mid kamid ah macallimiinta nagala qaybgalay daraasadda oo ah mid ku soo jiray xirfaddan in ka badan 30 sano, ayaa bixiyana \$100 bishii oo kiro ah, mushaarkiisuna wuxuu yahay \$90 bishii. Macallin kale oo bishii qaata \$200 ayaa sheegay in aysan ku filnayn noloshiisa sidaa darteedna shaqo labaad uu galay.

Ma jiro qaab u degsan qiimaha maashuurka la bixiyo, iyadoo mushaaraadkuna ay yihiin kuwo kala duwan marka la fiiriyo iskuul walba iyo iskuullada qaarkood oo laf ahaantooda aysan macallimiintu qaadan mushaar isku mid ah, taasoo horseedday niyad jab.

Waxaa la tilmaamay in macallimiinta ka shaqeeya iskuullada dawladda aanay mushaarkooda si toos ah u helin. Sarkaal sare oo wasaaradda waxbarashada ka tirsan ayaa noo sheegay in macallimiintu “mararka

qaarkood ay saddex bilood mushaar la’aan noqdaan”. Mushaaraadka macallimiinta ka shaqaysa iskuullada dawladda ayaa ka kala yimaada labo meelood oo kala ah wasaaradda waxbarashada iyo deeq-bixiyayaasha caalamiga ah, inkasta oo ay wasaaraddu maamusho wixii lacago ah. Wasaaradda ayaa sheegtay in macallimiin badan ay shaqada ka tageen taasoo sidoo kalana ay xaqiijisay cilmibaaristu.

“Ma rabo inaan macallin sii ahaado. Niyad uma hayo inaan macallin sii ahaado. Mushaar ku aad buu u yaryahay, fursadaha ah in mushaar kordhin la sameeyana aad bay u yaryihiin,” ayuu yiri mid ka mid ah macallimiinta.

“Soomaaliya macallinnimadu kama ahan wax la jecelyahay,” sidaa waxaa yiri mid kamid ah gudoomiyayaasha dalladaha. “Hadii xataa lacag la’aan la isku siiyo shahaadooda macallinnimo, ma ahan mid la jeclaan doono. Waxay dadka ka jecelyihiin takhasusyada maadooyinka kale sida: kalkaaliye caafimaad iyo injineernimada. Waalid kasta wuxuu raba in carruurtiisa uu macallin wanaagsan u helo marka ay iskuulka dhiganayaan iyo marka ay jaamacadda dhiganayaan, laakiin ma rabaan in carruurtoodu macallimiin noqdaan.”

Weliba, inkastoo qaarkood ay sheegeen in macallimiinta la xushmeeyo haddana waalidiintii aan waraysannay ma aysan sheegin inay ku farxayaan haddii carruurtoodu macallimiin noqdaan. “Ma rabo in carruurtaydu macallimiin noqoto,” ayuu yiri mid kamid ah waalidiintii nala hadashay. “Macallimiinta waddankan lama xushmeeyo, carruurtayduna waxay kamid yihiin bulshada waana ogyihiin qiimaha macallimiinta. Marka hadii aan xataa ku iraaqdo macallimiin noqda iga yeeli maayaan.”

Arrinkan waxaa isna sii xoojiyay mid kamid ah saraakiisha wasaaradda waxbarashada oo sheegay in ilaa laga xallinayo arrinka ku saabsan mushaararka iyo xushmada in xirfaddan ay waayayso dadka aqoonta u leh, waxaana ku adkaan doonta inay shaqaaleysiiyaan ardada fahamka wanaagsan ee soo qalin-jabinaysa – taasoo jab wayn ku ah nidaamka waxbarashada dalka. “Ma jirto cid rabta in macallin ay noqoto, sababtoo ah dadkii waxay aamineen in macallimiinta aan mushaar fiican la siinin oo aysan jirin wax xushmad ah oo bulshadu ay u hayso. Iyadoo arrinkan aan laga hortagin oo aan wax laga qaban, ma jirto cid ku soo biiri doonta xirfadaas,” ayuu sii raaciyay sarkaalkaasi ka tirsanaa wasaaradda waxbarashada ee Dawladda Soomaaliya.

Macallimiin yaraan

Cilmibaaristan waxay muujisay in Soomaaliya ay soo food-saartay macallimiin yari heer walba oo kamid ah waxbarashada aasaasiga ah. Macallimiin yaridaan waxaa si fudud looga dareemi karaa labo dhinac - marka la isku fiiriyo tirada ardada iyo macallimiinta iyo la'aanta macallimiin ku takhasusay maadooyinka ay dhigayaan.

Macallimiintu waxay wax u dhigaan arday tiro badan mararka qaar fasalka 50 arday ayaa fadhida. Dugsiga hoose oo ardada dhigata ay yihiin 560 ayaa waxaa dhigaya 11 macallin oo kali ah. Dugsi sare ayaa isna ay dhigtaan arday gaaraysa 300 balse macallimiintu ay yihiin todobo kali ah. Macallimiinta qaar ayaa shaqeyaa labo wakhti, si ay u daboolaan baahida sii kordhaysa. “Dhibaataada ugu ballaaran ee imminka jirta waa macallimiin yaraanta. Waxaa loo baahanyahay macallimiin badan.” Sidaa waxaa yiri maamule iskuul.

La'aanta macallimiin haysata takhasuska maadooyinka ay dhigayaan ayaa iyaduna ah mid kamid ah dhibaatooyinka. Waxaa noo soo

baxday in macallimiinta qaar ay dhigayeen maaddooyin aysan xitaa baran, sida ganacsiga iyo cilmiga bulashada. “Waxaa loo baahanyahay macallimiin aqoon u leh waxa ay dhigayaan, gaar ahaanna maaddooyinka sayniska ah,” ayuu yiri maamule.

Gunaanadka

Ujeedka laga lahaa daraasaddan waxay ahayd inaan baarno caqabadaha waxbarashada Soomaaliya soo wajahaya xilligan oo ay ka baxday kumeelgaarnimadii. Waxaana baaritaankeenna kasoo baxay in Soomaaliya ay soo wajahayaan caqabado fogaaday oo dhanka waxbarashada ah kuwaasoo u baahan dadaal la isu geeyo oo la isugu tago sidii wax looga qaban lahaa. Caqabada ugu waaway ayaa waxay ka jiraan dhinacyada manhajka, siyaasadda luqadda wax lagu baranayo iyo barayaasha. Inkasta oo ay muuqato inuu bilowday wadatashi dadaalka ay dawladda Soomaaliya ku hawlgalinayso nidaamka waxbarashada dalka, haddana waxaa loo baahan yahay in la dadejiyo lagana dhigo mid habaysan.

Talooyin tixgein mudan

Innagoo ku salaynayna xogtii aan helnay, waxaan soo gudbinaynaa talooyinkan tixgelinta mudan:

Ku socota dawladda Soomaaliya

- Qaado doorkaaga kormeeranimo soona saar siyaasado iyo sharciyo lagu maamulo nidaamka waxbarashada dalka. Habkaan waa inuu ahaadaa mid dawladdu ay kala tashato dhinacyada ay khusayso balse waa inay iyadu hoggaanka lahaato.

- Magacow guddi qaran oo ah mid leh aqoon iyo sumcad kaasoo dib u eegis ku sameeya isla markaana horumariya manhaj qaran oo ka jawaabaya caqabadaha Soomaaliya soo wajahaya haatan iyo kuwa mustaqbalkaba.

- Samee machad lagu tababaro macallimiinta iyo mashruuc tababarka macallimiinta ah iyadoo lagala tashanayo dhinacyada ay khusayso iyo kuwo bixiya tacliinta sare.

- U sug macallimiinta mushaar noloshooda ku filan kaasoo ah mid sharcigu ilaaliyo.

Ku socota dalladaha waxbarashada iyo maamulayaasha iskuullada

- Si buuxda u taageera dadaallada ay dawladdu ku doonayso inay ku samayso isbaddel iyo dib u dhis ku saabsan habka waxbarashada dalka.

- Kor u qaad mushaarka macallimiinta iyo baahidooda horumarka xirfadeed. Macallimiinta waa in la siiyo mushaaraad ku filan, waana in mushaarkooda ay helaan bil walba dhammaadkeeda.

- Xaqiiji in macallimiintu ay leeyihiin tababar aasaasi ah inta aysan bilaabin inay wax baraan ardada.

Ku socota dadweynaha

- Si buuxda oo waxtar leh uga qaybqaata doodka ku saabsan waxbarashada dalka ee bilaabatay.

- Ogsoonow in waxbarashada ardaydu ay tahay mid shirko lagu yahay waalidiintuna ay yihiin tiir muhiim ah, loona baahanyahay inay ka qaybqaataan si isbaddelku u noqdo mid saamayn yeesha.

- U dood nolol wanaagsan sidii ay ugu noolaan lahaayeen macallimiinta loona siin lahaa taageero lagu horumarinayo xaaladdooda nololeed.

Tixraaca

Abdi, A. (1998). Waxbarashada Soomaaliya: taariikhda, burburka, iyo baaqyada dib u dhiska. *Isbarbardhigga waxbarashada*, 34(3), 327-340.

Abdinoor, A. (2008). Bulshada oo isu xilqaantay kaalintii dawlada looga fadhiiyay ee waxbarashada Soomaaliya xilligii dawlada la'aanta. *Waxbarashada caalamiga ah*, 37(2), 43-61.

Al-Missned, M. (2010). 'Sharciiga caalamiga ah iyo ilaalinta nidaamka waxbarashada'. Ka dhowrida goobaha waxbarashada in la weeraro: dib u eegista xaalada fanka. Paris, UNESCO, Paris, 147-177.

Bush, K.D., & Saltarelli D. (2000). Labada waji ee waxbarashada xilliga dagaallada isirka ku salaysan: dhanka waxbarashada caruurta ee ku saabsan nabad-dhisidda. UNICEF, Xarunta cilmi-baarista ee Innocenti, Florence.

Ururka Cilmi baarista waxbarashada ee Britain (2004). 'Anshaxa la saxay ee haga Cilmi-baarista Waxbarashada (2004)'. Laga helikaro at: <https://www.bera.ac.uk/wp-content/uploads/2014/02/ethica1.pdf> [accessed 8 December 2014].

Cassanelli, L., & Abdikadir, F.S. (2008). Soomaaliya: Waxbarashada KMG ah. *Bildhaan*, 7(1), 91-125.

DFID (2001). Waxyaabaha sababa dagaallada wadamada ka hooseeya Saxaaraha Afrika; dikumiintiga lagu shaqaynayo. London, UK: DFID.

Elmi, A. (2010). Fahmitaanka holacii Soomaaliya: Haybta, Islaamka siyaasiga ah iyo nabad-dhisidda. London and New York, NY: Pluto Press.

Freeman, S.W., Weinstein, H.M., Murphy, K. and Longman, T. (2008). Dhigitaanka taariikhda kadib marka ay dhacaan colaadaha ku salaysan haybta: Khibradii laga dhaxlay Rwanda. *Isbarbardhigidda waxbarashada oo dib loo eegay*, 52(4), 663-690.

Gacheche, K. (2010). Caqabadaha hortaagan hirgalinta siyaasada ah in luuqada hooyo wax lagu barto: Siyaasadaha iyo sida loogu shaqeyo Kenya. *POLIS Journal*. 4 (winter), 1-45.

Hodgkin, M. (2006). Dib u heshiisiintii Rwanda: Waxbarashada, Taariikhda iyo dalka. *Joornaalka arrimaha caalamiga ah*, 60(1), 199-211.

Islaamka, R.D. (2007). Waxbarashada Afghanistan: baahida loo qabo xaqiijinta amniga iyo horumarka. *DIAS-Analyse Nr.21, Düsseldorf Institut für Außen- und Sicherheitspolitik. V., Fakultät, Germany*. Available at: http://www.dias-online.org/fileadmin/templates/downloads/DIAS_Analysen/Analyse21.pdf [accessed 3 July 2014].

Kosonen, K., & Young, C. (2009). Hordhaca. In M. Redmond (Eds.), *Luuqada hooyo inay noqoto buundada loogu gudbayo luuqada dalka waxbarashadiisa loo isticmaali doono: Siyaasadaha iyo khibrada wadamada koonfur-bari qaarada Asia (8-21)*. Bangkok: Ururka ay ku midaysanyihiin Wasiirrada waxbarashada ee wadamada koonfur-bari Asia (SEAMEO) xoghaynta.

Lindley, A. (2008). Xiriirada KMG ah iyo waxbarashada xaalada Soomaaliya. *Joornaalkadaraasada bariga Afrika*, 2(3), 401-414.

Wasaaradda arrimaha rayidka ee Bosnia iyo Herzegovina. (2004). *Horumarinta waxbarashada ee Bosnia iyo Herzegovina – Warbixinta qaranka*.

Qorshaha waxbarashada qaranka ee dalka Afghanistan.(2007). Jamhuuriyada islaamiga ah ee Afghanistan Wasaaradda waxbarashada. Obura, A. (2003). Never Again(Mardambe ha samayn). Dib u dhiskii waxbarashada Rwanda.Paris, Machadka caalamiga ah ee qorshaynta waxbarashada: UNESCO.

O'Malley, B. (2007). Weerar lagu hayo waxbarashada. Paris, France:UNESCO.

Paulson, J. (2011). Colaad, Waxbarashadaiyo Manhaj dib u eegista horay, haddaiyo mustaqbalkaba.Colaadiyowaxbarashada, 1(1), 1-5.

Rose, P., & Greeley, M. (2006). Waxbarashada wadamada curdinka ah: qabashada casharrada iyo soo xulashada ku shaqayn wanaagsan. Brighton: Machadka daraasaadka horumarinta.

Sinclair, M. (2010). 'Ilaalinta iyadoo la marayo Manhajka: Baaq wadashaqayneed' Si waxbarashada looga ilaaliyo weerarada: dib u eegista xaalada fanka.Paris,279-301. Paris: UNESCO. Available at: <http://unesdoc.unesco.org/images/0018/001867/186732e.pdf>[accessed 8 July 2014].

Sinclair, M. (2002). Qorshaynta waxbarashada marka lagu jiro ama ka dambaysa xaaladaha degdegga ah. Paris, Machadka caalamiga ah ee qorshaynta waxbarashada: UNESCO.

Sommers, M. (2002).Carruurta, waxbarashada iyo dagaalka: Gaarsiinta waxbarashada dhammaan(EFA) ujeedooyinka wadamada ay saameeyeen colaaduhu. Washington, DC:Bangiga aduunka.

Trudell, B. (2008). Luuqada hooyo ayaa mudan: Luuqadaha maxalliga ah oo fure u ah waxbarasho waxtar leh. Paris:UNESCO.

UNESCO. (1999). Hubka dhigidda taariikhda: Shirka caalamiga ah ee ka hortagidda mala'waalka iyo yasmada ku qoran buugaagta taariikhda ee koonfur bari Asia, Gotland, Sweden, 23-25.

UNESCO. (2006). Caqabadaha hortaagan hirgalinta waxbarashada bilaashka ah ee Kenya: Warbixinta qiimaynta ah[online]. Waxaa laga heli karaa: unesdoc.unesco.org/images/0015/001516/151654eo.pdf [accessed 8 August 2014].

UNESCO. (2010). Ka ilaalinta weerarada goobaha waxbarashada: dib u eegista xaalada fanka. Paris. Waxaad ka heli kartaa: <http://unesdoc.unesco.org/images/0018/001867/186732e.pdf>[accessed 7 August 2014].

UNICEF.(2011).Kaalinta waxbarashada ee dhisitaanka nabadda, dib u eegista dhaqanka. New York, USA.

UNICEF.(2014). Go'doonsan, Saamaynta bururka leh ee caruurta uu ku yeeshay sadex sano dagaalka ka socda Suuriya.

World Bank. (2002). Dib u dhiska adeegyada bulshada kadib colaada: arrimaha muhiimka ah iyo casharrada laga dhaxlay khibradaas. CPR qoraalo faafineed, No. 1. Washington, D.C.: Bangiga aduunka.

